

Maxaa weriyayaashiyo

Kugu diray Wargeysyada

Wargeyskan Riyaq iyo  
Waddankan Kacaankii  
Inuu waranka weyn daro  
Kacaan diid wareeroo  
Sirteenna u walwaaliyo  
Warka loogu werin jirey

Waxyaqaan Akhriyayow  
Weydaartay baa waa  
Wiilka lala damcaayaba  
Waddamada Shisheeyaha  
Mahbar weeye weyn baa

Miskiinkii la weeraray  
Ayaa wiigyar gudihiis  
Waayadaas horeetiyo  
Waxaa I markhaatiya  
Bal warayso adiguba

Isagoon waxba ogeyn  
Xabsi loo waddici jirey  
Waxyeelooyinkii dhacay  
Waayeelki joogaye

Wacyiga manta joogiyo  
Wadiiqadi kacaankiyo  
Weriye afrikaanaba  
Kin-Sara-Wiwi-yo  
U ekaa war ii baxay

Markan eegay waayaha  
Ma waddadii horeetaa  
Weerar baa dul saarane  
Wixi shalayto loo diley

Dawladdan wadaagiyo  
Walaalow ku timideey  
Kugu diray Wargeysyada?

Qoysba wiil ha keeniyo  
Ma waxaa weriyayaashiyo

Waddaniga wax tebayaa  
Axdigaaba weriyaye  
Maxaw weeraraysaan?

Inuu weer ku oran karo  
War saxaafadeedyada

Waayeel reer u weyn iyo  
Waano kaa sugaynaye  
Uu weer yiraahdaba

Sidii waalidkii-baan  
Haddii wiil mucaaradi  
Maka wayraxaysaan?

Afartaas ka weecdaye  
Wadaada intaad qaar  
Wixii ay ka weriyaan

Waw kale waxan iri  
U waraysataan qaar  
Yaan warkooda loo qaban

Waxan ugu danabyntii  
Waanadiyo tusaalaha  
Walaal baa ku siiyee  
Dhibrin waalidnimo iyo  
Ogow shacab wir hadal iyo  
Cabburis laguma wadi karo  
Wanaag iyo samaanloo  
Waayeel doonay soo waa  
Waanada ku soo xiray

Warkaygi ku soo xiray  
Wadeygaa ku jecel iyo  
Weligaa dul qaad iyo  
U waayeelin mooyee  
Waran lagula duuliyo  
Wax cadliga ka wacanoo  
Cidna aan waxyeelay  
Waxaan wawga gabaygiyo  
Waddadaas haddii aan

Wanaagga leh la racayn

Wadeeca ALLAH baan iri

MMX Gani  
1997/August.